

Daryeel-bixiyeyaashu maalin kasta ayay u yimaadaan inay daryeelaan dadka kale, adiguna sidoo kale waxaad mudan tahay daryeel iyo taageero.

Yoolkeena waa inaan kuu fududeyno inaad hesho daryeel caafimaad oo tayo sare leh oo kharash ahaan la awoodi karo, si aad diiradda u saarto caafimaadkaaga, qoyskaaga, iyo shaqada muhiimka ah ee aad qabato.

Hagahan wuxuu ku siinayaa faham ku saabsan xulashooyinka caymiskaaga iyo tallaabooyinka aad qaadi karto si aad u codsato. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku taageerno adiga iyo daryeelka muhiimka ah ee aad bixiso.

Ka dib markaad dib u eegto caymiskaaga caafimaad, qaado waqti aad ku sahmisoo dheefaha kale ee daryeel-bixiyeyaasha. Laga bilaabo fursadaha tababarka iyo dheefaha hawlgabka ilaa kabo bilaash ah oo aan simbiririxshon lahayn iyo sheqo ku beegga iyadoo loo maraayo Carina, dheefahan waxaa loogu talagalay inay ku taageeraan. Booqo myseiu.be/bg si aad wax badan u ogaato.



Merissa Clyde,
Maamulaha Guud
SEIU 775 Benefits Group

Tilmaamo Tallaabo-ka-Tallaabo ah oo ku aadan Codsashada Caymiska

1) Wax badan ka ogoow caymiskaaga

- **Sahmi xulashooyinka caymiskaaga oo dib u eeg Faahfaahinta Qorshahaaga** si aad u fahanto kharashaadka aad adigu jeebka ka bixineyso kahor magdhawga caymiska ee la xiriira daawo qoritaanka, daaweynta iyo adeegyada caadiga ah.
- **Dib uga eeg faahfaahinta u qalmitaanka** bogga 5 si aad u aragto haddii aad u qalanto.
- **Dooro ikhtiyaarka caymiska iyo qorshaha ilkaha.**

2) Isu diyaari inaad codsato

- **Soo ururi macluumaadkaaga.** Waxaad u baahan tahay lambarkaaga Soshal Sekuritiga iyo magaca shaqo-bixiyaha si aad u codsato.
- **Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Soo ururi dukumentiyada Xaqiijinta Ku Tiirsanaanta.** Wax badan baro oona ka hel tilmaamo barta myseiu.be/cfk.

3) Samayso koontada dheefaha caafimaadka

- **Baro sida looga sameysto koonto barta myseiu.be/hba.** Acoonkaaga waxaa maareeya MagnaCare, maamulahaaga dheefaha caafimaadka. Koontooyinka hadda waxaa lagu heli karaa Af-Ingiriisi. Haddii aad u baahan tahay caawin ama taageerada luuqadda wac 1-877-606-6705.

4) Gudbi codsigaaga

- **Ka buuxi codsi ka hor waqtiga kama dambaysta ah** barta myseiu.be/magnacare ama iimayl ahaan. Wax badan ka baro bogga 5.
- **Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Soo gudbi dukumiintiyada Xaqiijinta ku Tiirsanaanta** marka aad codsaneyso. Ka baro sidaad u soo gudbin lahayd dukumiintiyadaada barta myseiu.be/cfk.

Waxaad ku heli doonta rasiidka codsiga iimayl ahaan 1 maalin gudaheed iyo go'aanka caymiska iimayl ahaan 30 maalmood gudahood. Haddii kale, wac 1-877-606-6705.